

# West Seattle & Ballard Balaarinta Tareenka Fudud Abuurista Bulshooyin Isku Xiran

Tareenka fudud (light rail) ee Link wuxuu ku fidayaa Seattle!


Sound Transit waxay dhisaysaa 13 saldhig tareen oo cusub oo la balaariyay oo u adeeg doona West Seattle 2032\* iyo Ballard 2037-2039\*. Balaarintan weyn ee tareenada fudud ee Seattle waxaa ka mid ah tunnel cusub oo hoos mara Magaalada hoose iyo laba isgoys oo biyo ah. Waa maalgashigii ugu weynaa ee tariikhda magaaladeena.

Magaaladu waxa ay qorshaynaysaa tareen cusub si loo hubiyo isku xirka gaadiidka degdega ah ee la isku halayn karo ee ka dhexeeya xaafadaha iyo xarumaha shaqada, iyo sidoo kale si kor loogu qaado xaafadaheena. maadama ay noqonayaan kuwo la isku darsama loo wada dhan yahay, la awoodi karo, oo isku xiran.

\*Faahfaahinta taariikhaha bixinta mashruuca, fadlan tixraac website-ka Sound Transit ([bit.ly/3Bq6WQ](http://bit.ly/3Bq6WQ))




## Aan qorshe wadajir ah samayno

- Sinnaanta jinsiyadda iyo caddaaladda bulshada ayaa ah aasaaska go'aan ka gaarista magaalada ee saldhigyada tareenada fudud iyo toosinta.
- Adeegga cusub ee tareenka korontada ku shaqeeya oo xaafadaada loo samaynaayo ayaa kusiinaaya dookh haboon oo la isku halayn karo oo aad ku tagto meesha aad rabto inaad tagto.
- Guryaha qiimaha jaban iyo ganacsiyada ku yaala aaga xarumaha ayaa abuuri kara bulsho isku dhafan oo leh meelo badan oo ay ku noolaadaan, ka shaqeeyaan, ayna ka dukaamaystaan.
- Yaraynta ku tiirsanaanta baabuurta iyo siinta dadka deegaanka si dhab ah, beddelka tamarta nadiifka ah ee gaadiidka waxay naga caawin doontaa inaan la dagaallano isbeddelka cimilada.






**Magaalada Seattle iyo Sound Transit waxay ka wada shaqaynayaan sidii ay jaaliyadahu uga qayb qaadan lahaayeen hawshan oo dhan. La-hawlgale kastaa waxa uu door ka ciyaaraa isku xirka bulshooyinka si mashruucan loo dhamaystiro wakhtiga loogu talagalay miisaaniyad ahaan, siyaalo ka jawaabaya baahiyaha iyo rabitaanka bulshada.**

### City of Seattle Doorka

-  Duqa magaalada Bruce Harrell iyo xubin ka tirsan golaha deegaanka Debora Juarez waxay ku jiraan guddiga Sound Transit ee samayn doona go'aannada kama dambaysta ah.
-  Qorshee guriyeynta, ganacsiyadaha iyo meelaha bannaan si kor loogu qaado xaafadaha waaweyn ee agagaarka saldhigyada cusub.
-  Inay so saaraan ogolaansho loo siinaayo Sound Transit inay dhisto xarumaha iyo jidadka.

### SOUNDTRANSIT Doorka

-  Inay qiimeeyaan sida la isku waafajin karo iyo goobaha laga dhisaayo xarumaha.
-  Inay sii diyaarshaan qorshaynta, dib u eegista bii'ada iyo naqshada hanaanka wadada tareenka korontada ku shaqeeya.
-  Inay dhisaan ayna maamulaan nidaam cusub oo tareenka korontada ku shaqeeya ah.



## Waqtiga

### Ka-qaybgalka Bulshada ee socda

Gudiga Sound Transit waxay aqoonsadeen beddelka la doorbidayo ee tareenka West Seattle Link, waxay codsadeen daraasad dheeraad ah oo ku saabsan beddelka tareenka Ballard Link

Luulyo 2022

Magaalada & Sound Transit waxay sahaminayaan ka qaybgalka dadweynaha ee Qorshaynta Macnaha guud ee Saldhigga

Dabayaaqada 2022-Bartamiha 2023

Gudiga Sound Transit waxay dib u eegayan daraasadda la codsaday

Goanka guddiga ee tareenka Ballard Link waa lagu dhawaaqaya

Febraayo 2023

Bayaanka Saamaynta Maskaxda ee Ugu Danbaysa (FEIS) waa la daabacay

Dabayaaqadii 2023-Horaanta 2024

Isku toosinta dariiqa ugu dambeeya & goobaha saldhiga

waxaa xaqiijiyay guddiga gaadiidka sound, maamulka federaalka gaadiidka, & Golaha Magaalada Seattle


Horaanta 2024

## Qorshaynta agagaarka Saldhigyada

Ka dib marka Sound Transit aqoonsato goobaha ugu dambeeya ee tareenka fudud horraanta 2024, Magaalada Seattle waxay bilaabi doontaa nidaamka qorshaynta aagga saldhiga waxayna kala shaqayn doontaa jaaliyadaha:

- Qorshaynta socodka, baaskiilka, iyo horumarinta baska si lagaaga caawiyo inaad gaarto goobaha tareenka laga raacaayo.
- Aqoonso fursadaha guriyeynta, dukaamaysiga, iyo meelaha bannaan si aad u abuurto xaafado la awoodi karo, oo lagu noolaan karo agagaarka saldhigyada cusub.
- Sidii loo aburi lahaa muhimadaha u dagan sidii loo soo gudbin lahaa oggolaanshaha mashruuca.

Magaaladu waxa ay ka shaqaynaysaa sidii ay u hirgalin lahayd jinsiyadda iyo cadaalada bulshada inta uu mashruucu socdo, iyada oo si gaar ah diiradda u saaraysa bulshooyinka midabka leh ee xaafadahoodu ay taariikh ahaan dhabarka u riteen culaysyada mashaariicda waaweyn ee kaabayaasha dhaqaalaha.



Magaalada Seattle iyo Sound Transit waxay ka wada shaqaynayaan sidii loo qorsheyn lahaa **Macnaha Saldhigga** aagga, oo ah aagga hal ilaa laba baloog u jira saldhigga. Qorshaynta macnaha saldhigga waxa ka mid ah doorashooyinka naqshadaynta saldhigga lafteeda, meelaha banaan ee agagaarka saldhigga, joogsiyada baska, iyo in ka badan.

Magaaladu waxay mas'uul ka tahay la shaqaynta bulshooyinka si loo qorsheeyo **Aagga Saldhigga** ballaaran, kaas oo caadi ahaan ah aagga meel nus-mayl u jirta saldhigga.

## Lasoco Mashruuca

Wax ka baro shirarka bulshada ee soo socda ee magaalada oo iska diiwaan geli wixii ku cusub [seattle.gov/ligtrail](https://seattle.gov/ligtrail).

Si aad u hesho xogihii ugu danbeeyay ee mashruuca Sound Transit, booqo barta [soundtransit.org/wsblink](https://soundtransit.org/wsblink).

## Meelaha Lagala Xariiraayo magaalada Seattle

**Sara Maxana**  
Hogaaminta & Gaadiidka  
206.233.3369  
sara.maxana@seattle.gov

**Vera Giampietro**  
Qorshaynta & Naqshadeynta  
206.684.0431  
vera.giampietro@seattle.gov

**Nicole Kistler**  
Ka-qaybgalka  
206.962.9266  
nicole.kistler@seattle.gov

Wixii ku soo kordha iska diiwaan geli [seattle.gov/ligtrail](https://seattle.gov/ligtrail)

Magaalada Seattle waxay ku dhiirgelinaysaa qof walba inuu ka qaybqaato barnaamijyadeeda iyo waxqabadyadeeda. U adeegidda naafada, agabka qaababka kale duwan ah, ama macluumaadka gelitaanka, la xiriir Nicole Kistler | 206.962.9266 | [nicole.kistler@seattle.gov](mailto:nicole.kistler@seattle.gov) fursadaada ugu horeysa.